Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhihi jiray Salaad kasta oo faral ah

Waraad oo ahaa qoraagii Muqiira Binu Shucba Allaha ka raali ahaade waxaaa laga wariyey inuu yiri: Muqiira Binu Shucba ayaa iigu yeeriyey qoraal uu u diraayey mucaawiye: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu dhihi jiray Salaad kasta oo faral ah gadaasheeda: majiro mid xaq lagu caabudo oo aan Allah ahayn, waana kaligii oo malaha wax la wadaaga Ilaahnimadiisa iyo cibaadadiisaba, Isagay u sugnaatay mulki oo dhan iyo mahad oo dhan, Isagaana wax walba awooda, Allahayow majirto cid diidi karta wax aad bixinaysid, mana jirto cid bixin karta wax aad diido, mid awood lihina awoodiisu xagaaga wax uga tarto".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu oran jiray Salaad kasta oo faral ah gadaasheeda: majiro mid xaq lagu caabudo oo aan Allah ahayn, waana kaligii oo malaha wax la wadaaga Ilaahnimadiisa iyo cibaadadiisaba, Isagay u sugnaatay mulki oo dhan iyo mahad oo dhan, Isagaana wax walba awooda, Allahayow majiro cid diidi karta wax aad bixinaysid, mana jirto cid bixin karta wax aad diido, mid awood lihina awoodiisu xagaaga cid wax ugama tarto ". Waxaan qirayaa oo aqoonsanahay, kalimada tawxiidka, ee: laa ilaaha Ilaa Allah, cibaadada xaqa ah waxaan u qirayaa Allah oo kaliya, waana u diidayaa waxa Ilaahay kasoo hara oo dhan, mana jiro Ilaah xaq lagu caabudo oo Allah ahayn, waxaa kaloo qirsanahay mulkiga runta ah ee taamka ahi inuu Ilaahay leeyahay, dhamaan mahada kuwa ku sugan samooyinka iyo kuwa sugan dhulkuba inay Ilaahay u sugan tahay, waayo Isagaa ah Allaha wax walba awooda ah, waxa uu qadaro bixintiisa ee deeqihiisa ah, ama uu diido wax ka hor iman karaa majiro, mid qani ihi qanimadiisa xaga Ilaahay cidna wax ugama tarayo, waxaa wax taraya waa camalka saalixa ah oo kaliya.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65102